


SOMALI SOOMAALI



Warbixin ku saabsan tallaalka koroonaha ee degmada Drammen

Cudurka Covid-19 wuu ku soo badanayaa Norway iyo Drammen ba, gaar ahaan carruurta, dhallinyarada iyo dadka da'da dhexe ah. Weli waa muhiim in la xaddido fidista cudurka si ay u yaraadaan dadka sida khatarta ah u xanuunsanaya iyo dadka dhimanaya ba.

Bukaanka covid-19 ee hadda la dhigayo cisbitaallada ayaa u badan dad waayeel ah oo si buuxda u tallaalan iyo dad kale oo qaangaadh ah oo aan tallaalnayn.

Sida ugu wanaagsan ee lagu xakameyn karo fidista cudurku waa in la is tallaalo. Norway tallaalka koroonuhu waa bilaash. Ma u baahnid inaad haysato lambarka dhalashada/qofka ee Norway (personnummer) ama D-lambar si aad u hesho tallaalka, waxa kugu filan taariikhda dhalashada iyo magacaaga.

Norway qof kasta oo ka weyn 12 sano wuxuu hadda heli karaa tallaalka koroonaha.

Faa'iidooyinka tallaalka koroonaha:

- Inaad naftaada ka ilaaliso cudur halis ah iyo dhimasho haddii aad qaaddo fayruska
- Waxay yaraynaysaa khatarta ah inaad dadka kale qaadsiiyo
- Shahaadada koroonaha (Koronasertifikat)

Inta badan dhibaatooyinka ka yimaadaa waa kuwo aan khatar ahayn oo iskood u baxa muddo gaaban gudaheed. Khatarta dhibaatooyinka cudurka Covid-19 ayaa u muuqata inay aad uga sarreyso halista waxyeellooyinka tallaalku keeno.

Miyaad qabtaa su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga, khatarta adiga kugu iman karta ama welwel kale oo ku saabsan qaadashada tallaalka? La xidhiidh dhakhtarkaaga si aad arrintan ugala hadasho. Su'aalaha kale ee la xiriira tallaalka, la xiriir telefoonka tallaalka ee degmada 32 04 40 00.

Macluumaad loo baahan yahay:

Drammen waxa dadka lagu tallaallaa xarunta Gulskogen, xarunta tallaalku waxay furan tahay Isniin ilaa Jimce saacadaha 11.00-17.00.

Maalin kasta waxa dadka lagu tallaallaa Pfizer iyo Moderna.

Tallaalka waxa la qaadan karaa iyadoo aan balan la samaysan (drop-in), marka la qaadanayo irbadaha tallaalka ee 1-aad iyo 2-aad, iyo irbadda 3-aad ee dadka difaaca jidhkoodu aad u daciifay. Haddii aad rabto inaad ballan qabsato, wac 32 04 40 00.



**DRAMMEN
KOMMUNE**